Soo Koobidda Soo-jeedinta Adhmishanka

Muddada & Codsadayaasha U Qalmi Kara

- Joojinta siyaasadda hadda jirta **hal sano**
  - Degmadu waxay dib ugulaaban doontaa siyaasada hada jirta kadib nidaamka xulashada iskuulka ee sanad dugsiyeedkaan
- **Dhamaan reer Boston** kuwaas oo hadda dhigta fasalada 6, 8 (marka laga reebo ardayda hadda kujira iskuulka imtaxaanka), ama 9, oo buuxiya shuruudaha u-qalmitaanka, iyadoon loo eegin nooca iskuulku yahay
  - Celceliska ugu yar ee ah B ee ELA iyo Xisaabta xilliyada dayrta iyo xilliga qaboobaha ee sanad dugsiyeedkii la soo dhaafay (inta u dhexeysa Sebtember 2019 iyo Janaayo 2020); **AMA** helay natiijada dhibcaha laga rajeynayey ama ka sareesa ee 2019 MCAS ee ELA iyo Xisaabta. **Ardaydu uma baahna inay la kulmaan labadaba.**
  - Degmo iskuul (ama u dhiganta) xaqiijinta in ardaygu uu keensanayo heerka fasal oo ku saleysan heerarka Manhajka Massachusetts.

Dulmarka Guud ee Nidaamka Casuumaada

- **U qaybi casuumaadaha** ardayda iyadoo lagu saleynayo shuruudaha gelitaanka adhmishanka ee buundooyinka kaarka fasalka ee warbixinti hore iyo habka casuumaadda ee nambarka zip koodhka.
  - 20% kuraasta dugsi kasta oo imtixaan ah waxaa loo qoondeeyay ardayda ugu sarreysa magaalada ee ku saleysan GPA.
  - Inta soo hartay ee casuumaadaha waxaa loo qeybiyaa iyadoo la adeegsanayo isku darka GPA iyo nambarka guryaha ee ardeyga.

Habka Casuumaada - 20% Kuraasta

- **20% kuraasta dugsi kasta oo imtixaan ah waxaa lagu buuxin doonaa iyadoo la adeegsanayo GPA oo keliya**, oo dhigeysa ardayda ugu sareysa darajooyinka magaalada oo dhan.
  - Kala hormarinta meelaynta wuxuu ku salaysnaan doonaa darajada GPA, iyadoo ardaygu uu haysanayo GPA-ga la meeleynayo marka hore.
  - Haddii laba ama in ka badan oo arday ah ay isku darajo noqdaan, lambar bakhtiyo nasiib ah ayaa loo isticmaali doonaa si loo go'aamiyo ardayga la soo hormarin doono.
  - Ardayda waxaa loo tixgelin doonaa oo keliya iskuulka ay doorteen inuu yahay dookhooda ugu sareeya. Haddii ardaygu uusan ka helin kursi hawshan, waxay qayb ka noqon doonaan nidaamka labaad.
  - Ardayda galaya qeybta labaad ee howsha waxay leeyihiin fursad kale oo lagu meeleeynayo iskuulka dookhooda koowaad, waxayna u badan tahay inay helaan kursi tan iyo markii ay ka mid noqdeen kuwa ugu sareeya degmada.

Habka Casuumaada - 80% Kuraasta

- Inta **hartay 80%** ee casuumaadaha ayaa la **ballaarin doonaa iyada oo ku saleysan isku darka nambarka zip koodhka iyo GPA**.
  - Koodh kasta oo nambar zip ah ayaa loo qoondeyn doonaa tiro ka mid ah kuraasta dugsiga ee imtixaanka la heli karo iyadoo lagu saleynayo saamiga carruurta da'da dugsiga ee ku nool lambarka zip koodhkaas.
  - 10% kuraasta laga heli karo ee kujira lambarka koodh kasta ayaa loo qaybin doonaa illaa toban wareeg oo meelayn ah.
  - Ardayda waxaa la isugu geyn doonaa hal meel oo codsadeyaal ah oo ku wada nool isla lambarka zip koodhka hal isku mid ah oo lagu qiimeeynayo GPA.
  - Nambarada zip koodhka ayaa laga dalban doonaa *dakhliga ugu hooseeya ee qoyska dhexdhexadka ah* (*oo ay la socdaan carruurta ka yar 18 sano*) *ilaa dakhliga ugu sarreeya ee qoyska dhexdhexaadka ah* (*carruurta ka yar 18*) sida ku cad Sahanka Saafeyga Bulshada Mareykanka. Ardayda ku jirta lanbarka koodhka oo leh dakhliga ugu hooseeya ee dhexdhexaadka ah ee qoyska (oo ay la socdaan carruurta ka yar 18 sano) ayaa la meeleynayaa marka hore, waxaana ku xigi doona ardayda nambarka zip koodhka ku xiga.
  - Haddii ardayga kursigiisa xulashada koowaad aan la heli karin markay tahay waqtigooda in loo asteenayo, markaa ardayga waxaa lagu meeleyn doonaa xulashada labaad ama saddexaad ee kursigooda. Haddii ardayda laba ama in ka badan oo ku jira lambarka zip koodhka ay isku darajo noqdaan, lambar bakhtiyo nasiib ah ayaa loo isticmaali doonaa si loo go'aamiyo midka lasoo hormarin doono.

Fiiro gaar ah: Talada soo-jeedinta bilowga ah waxaa loo adeegsaday dakhliga qoyska dhexdhexaadka ah. Degmadu waxay ku talineysaa in wax laga beddelo dakhliga qoyska dhexdhexaadka ah ee carruurta ka yar 18 sano.

Wax ka beddelka Dakhliga Dhexdhexaadka ah

- Talabixintu waxay ka tarjumaysaa ka wareeggidda dakhliga guriga ee dhexdhexaadka ah uuna noqonaya dakhliga qoyska dhexdhexaadka ah (carruurta ka yar 18 sano).
  - Dakhliga guriga dhexdhexaadka ahi wuxuu ka tarjumayaa dhammaan qoysaska ku jira lambarka zip koodhka ah.
  - Sahanka Saafeyga Bulshada Mareykanka wuxuu ku qeexaa qoyska labo ama in kabadan shaqsiyaadka oo ay xiriirisay dhiig wada dhalasho, guur ama soo korsasho. Dakhliga qoyska dhexdhexaadka ah ee carruurta ka yar 18 sano kaliya waxaa ku jira qoysaska leh carruurta kujirta da'da iskuulka ee kujira lambarka zip koodhka.

Bixin Gaarka ah:
Ardayda Guri la'aanta ah iyo kuwa ku jira Daryeelka DCF Care

- **Ardayda la soo darristay guri la'aan ama kujira daryeelka DCF Care ee ka baxsan Boston**, waxaa lagu meeleyn doonaa "lanbarka zip koodhka" oo gooni ah, 99999.
  - Lambarka zip koodhka waxaa loola dhaqmi doonaa sidii lambarka zip koodhka oo leh dakhliga ugu hooseeya ee qoyska dhexdhexaadka ah (oo ay la socdaan carruurta ka yar 18 sano) iyo ardayda ka socota lambarka zip koodhkan ayaa marka hore la meeleynayaa.
  - Kala hormarinta meeleynta ardayga wuxuu ku saleysnaan doonaa darajada GPA, iyadoo ardayga lagu meeleynayo midka ugu sarreeya GPA ee kaalinta koowaad.
  - Haddii laba ama in ka badan oo arday ah ay isku darajo noqdaan, lambar bakhtiyo nasiib ah ayaa loo isticmaali doonaa si loo go'aamiyo ardayga la soo hormarin doono.
  - Ardayda aanan ahayn BPS waxaa lagu xaqiijin doonaa iyadoo laraacayo nidaamka xaqiijinta deggenaanshaha caadiga ah ee dugsiyada BPS.

Codbixin La Soo Jeediyay - Talooyinka Dheeraadka ah

- Bixi kaalmo ku habboon - labadaba ka hor iyo inta sannad dugsiyeedku socdo - ee loogu talagalay qirayaasha SY21-22 kuwaas oo, iyagoo aqoon ahaan u diyaarsan nuxurka iskuulka, waxay u baahan kartaa waqti dheeraad ah si ay ula qabsadaan xawaaraha daraasadda imtixaanka iskuulka.
- Ballaarinta Hindisaha Imtixaanka Iskuulka (ESI), oo bilaabmayo ugu horreyntiiba fasalka 4-aad oo soconaya illaa Oktoobar ee fasalka 6-aad, wuxuu diiradda saarayaa dardargelinta tacliinta ee ELA iyo xisaabta labadoodaba
- Hubi maalgelinta dheeriga ah ee ku habboon oo looga baahan yahay taageerada ardayda iyo ESI sida kor ku xusan.
- Sii wad qabashada koox hawleed si ay ugala taliyaan dadaallada joogtada ah ee lagu ballaarinayo isugeynta codsadaha, iyadoo la tixgelinayo adeegsiga imtixaanka cusub ee NWEA iyo qodobada kale, iyadoo lagu saleynayo waxa laga baran karo ku-dabakhidda talooyinka isqorista adhmishanka sannadkan iyo kooxda shaqadu ka bartaay dib-u-eegista looga dhaqmada degmooyinka kale.
- Wax ka beddel siyaasadda hadda jirta si meesha looga saaro “soo galid aan caado ahayn”(Oo la